

Haddii bixiyahaaga adeeggu joojiyo adeegyada, weli waxaad haysataa fursado.

Waxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota (DHS) waxay dib u eegaysaa bixiyeyaasha adeegyada ee gobolka oo dhan si loo hubiyo inay u hoggaansamaan sharciga isla markaana bixiyaan adeegyo ammaan ah oo tayo sare leh. Inta lagu jiro howshan, qaar ka mid ah bixiyeyaasha ayaa laga saari doonaa barnaamijka Medicaid (Medical Assistance). Bixiyeyaashu waxay dooran karaan inay xiraan adeegyadooda, ama waxay qaadan karaan racfaan oo ay sii wadi karaan inay u adeegaan dadka inta racfaankoodu socdo.

Haddii aad leedahay maareeye kiis ama qof ah isku-duwaha daryeelka:

Marka hore la xiriir si ay kaaga caawiyaan helitaanka bixiye adeeg oo cusub.

Ma hubtid meesha laga billaabo? La xiriir [xafiiska adeegyada bulshada ee degmadaada ama Qabiilkaaga Asalka ah](#) ama wac [adeegga xubnaha ee qorshahaaga caymiska caafimaadka](#).

Haddii aadan lahayn maareeye kiis ama isku-duwaha daryeelka:

Shaqaalaha DHS ayaa laga yaabaa inay la xiriiraan dadka halista ugu jira inay waayaan adeegyada ku jira qaybahan soo socda:

- Caawinta hawlaha nolol-maalmeedka: Adeegyada Kaalmada Daryeelka Shakhsiga (PCA) iyo Adeegyada Taageerada Bulshada ee Qofka u Suurtageliya inuu si Madax-bannaan ugu Noolaado Gurigiisa (CFSS).
- Taageerada caafimaadka dhimirka: Adeegyada Daaweynta Caafimaadka Dhimirka ee lagu bixiyo Xarun uu qofku Deggan yahay inta daaweyntu socoto (IRT) iyo Adeegyada Daaweynta Bulshada ee Joogtada ah (ACT) ee ay kooxda takhasuska leh bixiyaan.
- Adeegyada kor u qaada xasilloonida iyo xirfadaha nololeed ee madax-bannaan: Adeegyada Dib-u-soo-kabashada Caafimaadka Dhimirka ee Dadka Waaweyn (ARMHS) iyo Adeegyada Taageerada Dadka leh Waayo-aragnimo la mid ah (Peer Services).
- Adeegyada Dadka Maan-gaarka ah: Adeegyada Taageerada Hore ee Korriinka iyo Hab-dhaqanka (EIDBI).

Isticmaal kheyraadkan si aad u hesho bixiyeyaasha adeegyada iyo adeegyada laga heli karo deegaankaaga

Isticmaal taleefankaaga si aad u akhrisid QR koodka hoose si aad u hesho liiska oo dhammaystiran.

- Ka raadi [Liiska Bixiyeyaasha Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka Minnesota \(Minnesota Health Care Programs Provider Directory\)*](#)
- Ka eeg [Macluumaad loogu talagalay Dadka Waayeelka iyo Naafada ee Minnesota \(Minnesota Aging & Disability Resources\)](#) si aad u hesho adeegyo kala duwan. Sidoo kale eeg:
 - [Xarunta Naafada ee Disability Hub MN](#); 1-866-333-2466
 - [Minnesota Aging Pathways \(adeegga waayeelka Minnesota\)](#); 1-800-333-2433
- Kheyraadka caafimaadka dhimirka waxaad ka heli kartaa mn.gov/dhs/bha-resources; wac 211 ama booqo 211unitedway.org.
- Caawimaadda guriyeynta waxaad ka heli kartaa [Housing Benefits 101](#) iyo [HousingLink](#), halka caawimaad lacag la'aan ah ama qiimo jaban oo loogu talagalay dadka kiraystayaasha ah laga heli karo [HOME Line](#).
- Taageerada ay heli karaan dadka maan-gaarka ah waxaad ka booqaataa bogga macluumaadka ee [Minnesota Autism Resource Portal](#)
- Ka codso caawimaad dhaqaale oo booqo bogga [MNbenefits](#)

* Fiiro gaar ah: Liiska Bixiyeyaasha Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka ee Minnesota Health Care Programs Provider Directory waxaa ku jiri kara bixiyeyaal qorsheynaya inay xiraan adeegyadooda ama aan hadda qaadanayn macaamiil cusub

Wax su'aalo ah ma qabtaa?

La xiriir xafiiska Taageerada Macaamiisha Daryeelka Caafimaadka (HCCS) si lagaaga caawiyo helitaanka adeegyada caymisku daboolay ee khidmadda leh oo ka wac lambarka 1-800-657-3672 (Isniin ilaa Jimce, 8:00 subaxnimo ilaa 4:00 galabnimo).

Isticmaal taleefankaaga si aad u akhrido QR koodka si aad u hesho lifaaqyada liisaskan iyo macluumaad dheeraad ah oo ku yaal bogga internetka ee mn.gov/dhs/find-care-so

